## Liiska Hubinta Maqalka iyo Hadalka
(si ay uga caawiso la socodka maqalka ilmahaaga)

### Dhalashada ilaa laga gaarayo 3 bilood

- ☐ Waxay la qabsadaan dhawaaqyada ama codad
- ☐ Waxaa ka nixiya ama ay la boodaan marka ay maqlaan shanqadh kedis ah

### 3 ilaa 6 bilood

- ☐ Madaxa ama indhaha waxay u jeediyaan dhanka ay ka imaanayaan dhawaaqyada xiisaha leh
- ☐ Waxay u muuqdaan kuwo wax dhagaysanaya
- ☐ Si sahlan ayay u toosan marka ay maqlaan dhawaaqa
- ☐ Waxay bilaabaan inay sameeyaan dhawaaqyo u eg hadalka

### 6 ilaa 12 bilood

- ☐ Waxay fahmaan erayada fudud, tusaale; 'maya' & 'bye-bye'
- ☐ Waxay bilaabaan inay koobiyaan dhawaaqyada hadalka
- ☐ Madaxa ayay u leexiyaan dhanka dhawaaqyada fudud

### 12 ilaa 18 bilood

- ☐ Waxay u muuqdaan inay fahmayaan ereyo badan toddobaad kasta
- ☐ Marka wax la waydiiyo, dadka, xubnaha jidhka ama alaabta ay ku ciyaaraan ayay farta ku fiiqaan
- ☐ Waxay raacaan tilmaamaha fudud ee lagula hadlo tusaale. 'fadhiiso'
- ☐ Laba ilaa saddex erey oo dhab ah ayay dhihi karaan tusaale. 'kubad', 'eyga', 'baabuur'

## Ballanta Dhaqtarka Maqalka ee ilma-hayga

Kooxda Maqalka waxay rabaan inay hubiyaan maqal-ka ilmahaaga ka hor inta aysan gaarin 12 bilood. Way kula soo xiriiri doonaan si ay wakhti kuugu qabtaan.

### Ka warran haddaanan ballan qabsan karin?

Haddii aadan iman karin ballantaada, u sheeg dhakhtarkaaga maqalka sida ugu dhaqsaha badan ee aad awooddo ballanta ka hor si aad dib ugu dhigato.

### Ka warran haddii aan guurno?

Haddii aad u guurto xaafad ama magaalo kale, wac adeeggaaga Dhaqtarada Maqalka waxayna awoo-di doonaan inay kugula taliyaan mid adiga kuugu dhow.

### Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Barnaamijka Maqal Caafimaad leh, iskaan garee QR koodhka.

Haddii macluumaadka lagaala soo xiriiri karo ama cinwaanadaadu ay isbedelaan fadlan u sheeg adeega Maqalka, si ay kuula soo socodsiiyaan balamaha.

Haddi aadan wax war ah ka helin kooxdaada Maqalka marka uu ilmahaagu gaaro hal sano, la xidhiidh adeega maqalka si aad u qorsheyso balan.

Maqalka waxaa lagu tijaabin karaa da' kasta. Haddii aadan hadda haysan u-gudbinta Dhaqtarka Maqalka oo aad ka welwelsan tahay maqalka ilmahaaga, kala hadal dhakhtarka ilmahaaga wixii ku saabsan gudbinta si loo baaro maqalka ilmahaaga.

# Healthy Hearing Program

## Barnaamijka Maqalka Caafimaad Leh




## Your Baby's Follow-Up Hearing Check

### Hubinta Dabagalka Maqalka ee Ilma-haaga

Maqalka ilmuhu wuu is bedeli karaa wakhti ka dib.

Buug-yarahaan waxa uu sharxayaa sababta ay muhiimka u tahay in dhallaanka qaarkood dib loo eego maqalkooda marka la gaaro **dhalashadooda 1aad**, ama xilli hore mar-ka ay **da'da 6 toddobaad ku jiraan** haddii ay jiraan arrimo halis ah oo la aqoonsaday.

Queensland Government

Waxaa dib loo eegay 2024

# Maqal Caafimaad Leh ayaa muhiim u ah hadalka iyo horumarka luqadda ilmahaaga bilaha ugu horreeya ee nolosha

## Ilmahaygu waxa uu ku guulaystay baadhitaankii maqalka ee la sameeyay markuu dhashay. Maxay tahay sababta ay ugu baahan yihiin hubin maqal oo kale?

Ilmahaagu waxa uu leeyahay hal ama dhawr arrimood oo halis ah kuwaas oo kordhin kara fursadda uu ku yeelan karo lumis maqal marka ay sii weynaadaan.

Haddii ilmahaagu leeyahay mid ka mid ah qodobbada halista ah ee soo socda waxay heli doonaan baaritaan maqal oo faahfaahsan **6 toddobaad** gudahooda marka ay maraan baaritaanka maqalka ee dhallaanka:

- cillado la xiriira lumitaanka maqalka
- dhibaatooyinka qaabdhismeedka madaxa/wejiga tusaale. dillaacsan

Haddii mid ama in ka badan oo ka mid ah arrimahan halista ah ay jiraan ilmahaaga waxa la siin doonaa baadhista Maqalka **marka uu gaadho 1 sano:**

- taariikhda qoyska oo ah lumista maqalka oo joogto ah. Tani waxay ka dhigan tahay waalidiinta ama walaalaha ilmaha oo maqal la'aan ahaa tan iyo carruurnimadii
- Ku dhicitaanka caabuqyada qaarkood xilliga uurka ama dhalmada
- Neefsashada oo ay aad ugu dhibtoodaan marka ay dhashaan

In kasta oo tiro yar oo carruur ah oo leh arrimahan halista ahi ay dhab ahaantii yeeshaan maqal la'aan, waxaa muhiim ah in dabagalkan lagula socdo kooxda Maqalka.

## Ilmahaygu wuxuu u muuqdaa mid ka jawaabaya dhawaaqa. Weli miyay u baahan yihiin dabagalka dhegeysiga?

Inta badan dhallaanka qaba lumis maqal ayaa weli maqli doona oo ka jawaabi doona dhawaaqyada qaarkood. Sidaa darteed, in la ogaado lumista maqalka waa wax aan suurtagal ahayn iyada oo aan la helin baaritaan ku habboon.

In la ogaado maqal la'aanta goor hore waxay siinaysaa fursadda ugu fiican ee hadalka iyo horumarka luqadda ilmahaaga. Waxay muhiim u tahay waxbarashadooda mustaqbalka, samahaqabka bulsho iyo shucuureed.

## Maxaa la sameeyaa marka loo tago Dhaqtarka Maqalka?

Kooxda maqalka ayaa hubin doonta qaybaha kala duwan ee nidaamka maqalka ilmahaaga. Waxay sharixi doonaan baaritaan kasta iyo natiijada ballanta.

Baaritaanada ayaa xaqiijin doona haddii ilmahaagu leeyahay maqal ku filan si uu u horumariyo hadalka iyo luqadda, ama haddii ay yeesheen maqal la'aan.



Waxaa laga yaabaa in ilmahaagu u baahdo hal ama laba balamood si uu natiijooyin u helo.

## Kooxda Maqalka waxa ka mid ah:

Maqal-yaqaan ku takhasusay maqalka oo leh xirfadaha iyo qalabka loogu talagalay in lagu sameeyo baaritaanka maqalka oo faahfaahsan. Kaaliyaha Caafimaadka ee Allied ama Kaaliyaha Maqalka ee loo tababaray inay sameeyaan baaritaanada maqalka.

## Immisa ayay ku kacaysaa baaritaanka maqalku?

Adeegyada maqalka ee si guud loo bixiyo waa lacag la'aan waxaana heli kara dhallaanka **Medicare** u qalma, hadday ku dhasheen isbitaal dadweyne ama mid gaar loo leeyahay.Waxaa laga yaabaa inay jiraan lacago looga baahnaan doono dhallaanka aan Medicare u qalmin.
Haddii aad doorato inaad u tagto takhaatiirta maqalka ee gaarka ah, waxaan kugula talineynaa inaad kala hadasho kharashaadka iyaga ballanta ka hor.
Baarahaaga ayaa ku siin kara faahfaahinta adeegyada Maqalka ee agagaarkaaga.

## Maxaa dhacaya haddii ilmahaygu leeyahay maqal la'aan?

Haddii ilmahaagu qabo **lumis maqal oo muddo kooban ah**, kooxdaada Maqalka waxay rabi doonaan inay mar kale arkaan.Haddii lumista maqalka ee muddada kooban ah aysan soo ficnaan, kooxda Maqalka ayaa kula talin doona ilmahaagu inuu arko takhtarka dhegaha ee sanka iyo cunaha (Ear Nose and Throat - ENT).

Haddii ilmahaagu qabo **lumis maqal oo joogta ah**, Dhaqtarka maqalka ayaa u gudbin doona qaar ama dhamaan kuwan soo socda:

- Rugta Maqalka Carruurnimada
- Khabiirka Dhegta Sanka iyo Cunaha
- Dhakhtarka carruurta
- Maqalka Australia (Hearing Australia), si ay u helaan wixii ku habboon gargaarka maqalka
- Taageerada Qoyska ee Maqal Caafimaad Leh (Healthy Hearing Family Support - HHFS)
- Adeegyada kale ee takhasuska leh hadba sidii loogu baahdo.

HHFS waxay kaa caawin doontaa inay kugu xiraan adeegyadan.

Haddii aad ka welwelsan tahay maqalka ilmahaaga, waxaad wici kartaa kooxdaada Maqalka si aad u hesho ballan waqti hore ah.

Waxaa dib loo eegay 2024